



## Somalia Non-State Actors (SONSA)

Tell: +252612008723. Email: [info@sonsaplatform.org](mailto:info@sonsaplatform.org). Website: [www.sonsaplatform.com](http://www.sonsaplatform.com)

### War Saxaafadeed

22 SDecember 2019; waxaa manta shir wadatashi ah isugu yimid ururada bulshada rayidka Soomaaliyeed ee SONSA iyo guddiga loo xilsaaray wada-xaajoodka dawladda federalka Soomaaliya iyo Soomaaliland, si ay ururada bulshadu kaalin mug leh uga qaadan lahaayeen wadahallada bilaabmi doona haddii eebbe idmo.

Waxaan ogsoonahay in wada hadallada dawlada federalka Soomaaliya iyo Soomaaliland ay istaageen sannadkii 2014, annagoo dareensan in arrimaha hakadka geliyay ay sababo badan lahaayeen oo saameyn ku yeeshay busha-weynta Soomaaliyeed.

Haddaba si loo xoojiyo wada hadallada waxaa lagama maarmaan ah in wada-xaajoodka aanan lagu koobin dhinaca siyaasada balse la balaariyo oo qeybaha kala duwan ee bulshadu ay qeyb ku lahaadaan.

Ugu dambeyntii kasoo qeybgalayaasha ka socday ururada bulshada rayidka iyo guddiga loo xilsaaray wada hadallada dawlada federalka Soomaaliya iyo Soomaaliland waxa ay isla garteen arrimaha soo socda:-

1. In ay tahay lagama maarmaan in dib loo bilaabo wada hadallada dawlada federalka Soomaaliya iyo Soomaaliland.
2. In kulamo joogta ah ay guddigu la yeeshaan qeybaha kala duwan ee bulshada si xog ururintoodu u noqoto mid xog fiican lagu helo.
3. In laga fogaado tallaabo kasta oo keeni karta xasaasiyad isla markaana caqabad ku noqon karta wada hadallada.
4. In isku socodka iyo arrimaha isku xiri kara bulshada sida ganacsiga, horumarinta mashaariicda iyo ehelnimada aan culeys siyaasadeed dhinacna ku sameyn.

Dallada bulshada rayidka e SONSA iyo guddiga wada-xaajoodka dawlada federalka Soomaaliya iyo Soomaaliland waxa ay u mahad celinayaan dhammaan kasoo qeybgalayaasha.